



DAAWADA COVID-19

Daawada afka laga qaato ee ka hortagta fayraska

Daawada KOFID-19 ee kahortagta fayraska waxay ka caawiyaan dadka inay iska caabiyaan jirrooyinka. Paxlovid waxaa loogu talagalay dadka jira 12 sanno iyo ka weyn; molnupiravir waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee jira 18 sanno iyo ka weyn. Labadan daawooyin ee kahortagga fayraska waa kaniini afka aad ka qaadan karto.

Haddii aad la jirran tahay KOFID-19, daawada ka hortagta fayraska waxay kaa joojin kartaa inaad sii xannuunsato waxayna yaren kartaa muddada aad jirran tahay. Waxa laga yaabaa in aad daawadan hesho haddii afartan shay run yihiin:

- ✓ Haddii lagaa helay cudurka KOFID-19.
- ✓ Astamahaagu bilowdeen wax yar 5 maalmood kahor.
- ✓ Haddii aad halis ugu jirto KOFID-19 daran iyadoo ugu wacan tahay inaad da' weyn tahay ama aad qabto xaalad caafimaad sida sonkorowga, cudurrada wadnaha, ama cudurrada sambabka.
- ✓ Haddii aan isbitaal lagu dhigin sabab la xiriirta KOFID-19.

Inta badan daawooyinka KOFID-19 waa lacag la'aan laakiin waxaa jiri kara kharash iyo khidmada kale. Haddaad haysatid caymis warbixintaas sheeg markaad daawada qaadanaysid. Haddaad haysan caymis waydii daryeel-bixiyaha caafimaad ama farmashiyaha kharashka.

Booqo [Ikhtiyaarada Daaweynta COVID-19 \(www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html\)](http://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html), ama la hadal dhakhtarkaaga ama daryeel-bixiye caafimaad oo kale si aad u ogaato inaad isticmaali karto daawadan iyo si aad u hesho rug caafimaad.

Si aad u hesho macluumaad badan, waxaad ka wici kartaa Khadka Guud ee KOFID-19 lambarka 833-431-2053, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 7 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha, ama laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Sabti kasta.

U sheeg daryeel-bixiyahaaga caafimaad haddii:

- Aad uur leedahay ama qoyshaynayso inaad uur qaado
- Aad naasnuujinayso
- Aad qaadanayso daawooyin ama nafaqooyin kaabis ah
- Aad qabto wax xasaasiyado ah
- Aad qabto xanuuno halis ah

